Qoyska Xaanshida Xaqiiqada

# Natiijada Togan:

## Ogeysiinta Natiijada Dhiigga Laga Qaaday Ciribta

**Cytomegalovirus (CMV) Detected, Family Fact Sheet—Somali**

# Cytomegalovirus (CMV) La Helay

## Maxaa lagu ogaaday baaritaanka dhallaanka cusub?

Dhiiga laga qaaday ilmahaaga marka uu dhashay ayaa muujiyay inuu qabo fayras la yiraahdo cytomegalovirus (CMV).

## Maxay tani ka dhigan tahay?

Marka ilmuhu ku dhasho fayraska CMV, waxaa la yiraahdaa CMV-ga lagu dhasho (cCMV). CMV-ga lagu dhasho waa caabuq laga helo ilmaha markuu dhasho. Carruurta qaba cCMV ayaa lahaan kara astaamaha marka ay dhashaan, yeelan kara astaamaha inta ay ku jiraan carruurnimada, ama aan marna yeelan astaamaha cCMV.

Natiijada baaritaanka ilmaha ayaa ka dhignayn in ilmahaagu qabo cCMV, laakiin baaritaan dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo.

## Maxaa xiga oo dhici kara?

Dhakhtarka ilmahaaga ayaa hubin doonaa si loo eego haddii fayrasku uu sidoo kale ku jiro kaadida ilmahaaga. **Si aad u hesho natiijooyin sax ah, baaritaankaan waa in la sameeyaa kahor inta aan ilmahaagu gaarin 21 maalmood.**

Haddii CMV <u>aan laga helin</u> kaadida ilmahaaga, baaritaan kale ayaan loo baahan doonin.

Haddii CMV <u>laga helo</u> kaadida ilmahaaga, waxay ka dhigan tahay in ilmahaagu qabo caabuqa cCMV baaritaan dheeraad ah ayaana lagu talinayaa si loo baaro dhibaatooyinka caafimaadka ee ka dhashay cCMV:

- Dhiiga la qaado
- Baaritaanka maqalka ee uu sameeyo dhakhtarka maqalka ee carruurta
- Baaritaanka indhaha ee uu sameeyo dhakhtarka indhaha
- Altarasoonka madaxa

Waxaa sidoo kale lagaa codsan karaa inaad la kulanto taqasuslaha cudurada caabuqa (ID) ee carruurta.

## Waa maxay dhibaatooyinka caafimaadka ee ka dhasha cCMV?

<u>Qaar kamid ah</u> carruurta qaba cCMV ayaa lahaan doona astaamaha marka ay dhashaan, sida:

- Madaxa aadka u yar
- Jidh ka yar xadkii laga rabay da'da ilmaha
- Finanka maqaarka
- Maqaarka ama qaybta cad ee indhaha oo jaalle noqda
- Murqaha daciifka ah

<u>Qaar kamid ah</u> ilmaha (ku dhawaad 20%) qaba cCMV ayaa si abadiyan ah u dhago beeli doona. Dhago beelka ayaa ka bilaaban kara marka ilmuhu dhasho ama imaan kara xili danbe carruurnimada. Arintaan awgeed, waa muhiim in la sameeyo baaritaanka caadiga ah ee maqalka, xataa haddii aysan jirin wax astaamo kale ah marka ilmuhu dhasho.

<u>Inta badan</u> ilmaha qaba cCMV ayaa dhasha ayaga oo aan lahayn astaamaha xanuunka lagamana filaayo inay yeeshaan wax astaamo ah.

Baaritaanka ilmaha dhashay ayaan qiyaasi karin haddii ilmahaagu uu lahaan doono astaamaha ama haddii kale, waana taas sababta baaritaan dheeraad ah uu muhiim ugu yahay carruurta qaba cCMV.

## Waa maxay fursadaha daaweynta ee jira?

Inkasta oo aan cCMV daawo lahayn, haddana waa la maarayn karaa xanuunka. Daawooyinka suuragalka ah waxaa kamid ah:

- Luuqadda dhagoolka, agabka kaaba maqalka, baytariyada maqalka ee carruurta maqalku ka dhumo
- Daawada kahortagta fayraska, haddii uu ku taliyo taqasuslaha ID ga ee carruurta

Carruurta qaba cCMV waa inay u tagaan dhakhtarkooda caadiga ah iyo dhibaatiirta kale (marka loo baahdo) ayadoo lagu saleynaayo astaamaha jira.

## Dhigaalada

**National CMV Foundation**
www.nationalcmv.org

**Xarunta Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurada (Center for Disease Control and Prevention):**
www.cdc.gov/cmv/congenital-infection.html

**Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka:**
www.babysfirsttest.org